



Maalinta Laanqayrta Cas/Bisha Cas Adduunka – 2017

Farriinta Madaxweynaha SRCS

Sanadkasta 8-da Maajo, Dhaqdhaqaaqa Laanqayrta Cas iyo Bisha waxay u dabaaldegaan Maalinta Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas Adduunka. Ururka Bisha Cas (SRCS), iyadoo xubin firfircoon ka ah Dhaqdhaqaaqa ballaaran waxay abaabusha hawlaha si loo muujiyo maalintan muhiimadda leh.

Ururka Bisha Cas (SRCS) waa urur madaxbannaan oo dhexdhexaad ah waxayna dadka aadka u nugul oo ay ku jiraan dumarka iyo caruurta siisaa adeegyada daryeelka caafimaadka. Waxay maamushaa xarumaha dhaqan celinta naafada waxayna bixisaa adeegyada baafinta si loo soo celiyo xiriirka qoyska. SRCS iyadoo adeegsanaysa waxqabadyo ku saleysan bulshada waxay sidoo kale taageertaa dadka nugul si ay ugu diyaar gareyso xaalad kasta oo deg deg ah, u yareyso khatarta iyo u xoojiso adkeysiga.

Qeybo badan oo dalka ka mid ah waxaa soo food saartay xaaladaha abaarta daran iyadoo qeybo ballaaran oo dadka ka mid ah soo food saartay xaaladaha abaarta ba'an. Tan iyo kala barkii ugu dambeeyey 2016-kii abaartu waxay u fideysay si weyn saameynteeduna ay sii xumaaneysay waqtiba waqtiga ka dambeeyo. SRCS iyadoo taageero ka heleysa la hawl-galayaasha Dhaqdhaqaaqa iyo kuwa aan la hawl-galin dhaqdhaqaaqa waxay si wadajir ah kor ugu qaadeen waxqabadka bani'aadamnimada iyadoo bartilmaameedsaneysa dadka abaarta saameysay.

Munaasabadan, waxaan jeclaan lahaa in aan ku xuso doorka shaqaalaha SRCS iyo hawlaha mutadawiciinta. Gaar ahaan mutadawiciinta waa laf-dhabarka Jimciyad Qarameedka waxayna door muhiim ah ka qaataan ka jawaabida abaarta hadda taagan. Waxaan kaloo dooneyna in aan ballaarino fahanka dadweynaha ay ka haystaan SRCS iyadoo loo muujinayo kala duwanaanshaha shaqadeeda.

Hadaan mar kale ku soo celiyo balanqaadka SRCS ee adeegga bani'aadamnimo habboon oo waqtigii loogu talagaly la siiyo bulshooyinka nugul hadda iyo mustaqbalka. Waxaan la shaqeynaa bulshooyinka si wax looga qabto caqabadaha bani'aadamnimo iyadoo wax laga qabanaayo sababaha asalka ah.

Anigoo ka faa'ideysanaya fursadan, waxaan jeclaan lahaa in aan salaamo mutadawiciinta iyo shaqaalaha SRCS ee dadaalkooda iyo in ay u go'domeen caawinta dadka nugul oo dalka ku sugan. Waxaan mutadawiciinta iyo shaqaalaha SRCS iyo qoysaskooda munaasabadan saansaanta guusha xambaarsan u rajeynaya farxad soo noqnoqata.

Yuusuf Xasan Maxamed
Madaxweynaha SRCS